# Unugya iyo Isha

## TABARUCAADA





*"Waxa aad* **KA TAGTO** *maaha waxaa lagu* **XARDHAY** *dhagaxa taallooyin* **DHAGAX** *ah, laakiin waa wax lagu* **TOLAY NOLOSHA DADKA KALE***."*

*– Pericles*

*Marka la joogo waqtigan* leh murugada iyo khasaaraha, waxaanu u bandhignaa naxariisteena.
Waxaan rajeyneynaa inaad ka hesho istareex ogaanshaha in qofkaagii aad jeclayd uu caawin karo dadka kale marka la eego tabarucaadda unuggooda, indhahooda ama labadaba.

Tabarucaadda waa fal naxariis iyo deeqsinimo badan leh, waxayna ka tagtaa dhaxal qoto dheer. Marka loo eego hadiyadahooda aan caadiga ahayn, qofkaagii aad jeclayd waxa uu dadka kale siin doonaa rajo cusub, bogsiin iyo fursad uu dib ugu sameysto nolol buuxda oo farxad badan leh.

Qoys tabaruce ahaan, waxaad taageero ka heli doontaa LifeSource bilaha iyo sanadaha soo socda, oo ay ku jiraan agabyada murugada, fursadaha aad kaga qaybqaadan karto munaasabadaha xuska iyo inaad la xiriirto qoysaska kale ee murugaysan oo kuwoodii ay jeclaayeen ay bixiyeen hadiyadda nolosha. Fadlan ogow in adiga, qoyskaaga iyo qofkaagii aad jeclayd inaan la iloobi doonin.

U doodayaasha Qoyska Tabarucayaasheena ayaa halkan u jooga inay kugu taageeraan safarkaaga murugada oo ay kaaga jawaabaan su'aalo kasta oo aad qabtid. Waxaa lagala xiriiri karaa iyada oo la wacaayo **1.888.536.6283** ama iimayl ahaan **familyservices@life-source.org**.

## Caawinta Kuwa kale

Dhakhaatiirta qalliinka ayaa kutallaala unugyada iyo indhaha la tabarucay si ay u bogsiiyaan nolosha bukaanadooda. ***Lafta*** clagu tabarucay ayaa ka caawin karta ka saarida xanuunka waxayna soo celin kartaa dhaqdhaqaaqa bukaanada la silicsan dhaawaca lafaha ama waayey sababa la xiriiro kansar, dhaawac ama cudur. ***Unugyada isku xira*** Unugyo isku xiran ayaa laga yaabaa in la tallaalo si dib loogu hagaajiyo seedaha jilibka loona soo celiyo awoodda socodka, ama qalliinka dib u dhiska ee bukaannada qaba cillad qaabdhismeedka wajiga. ***Maqaarka*** lagu tabarucay waxaa laga yaabaa inuu caawiyo bukaanada u baahan qalliinka dib u dhiska ah oo loogu talagalay hagaajinta gidaarka caloosha, dhaawaca wajiga, gubasho qoto dheer, ama qalliinka jarida naaska ka dib kansarka naasaha. ***Xididdada*** iyo ***halbowlayaasha*** la tallaalay waxay siin karaan bukaannada awood ay ku socdaan mar kale, soo celiyaan wareegga dhiigga waxayna badbaadiyaan lugaha khatarta ah in la jaro. ***Waalalka wadnaha*** ee lagu tabarucay waxaa laga yaabaa inay badbaadiyaan carruurta ku dhalatay cilladaha wadnaha waxayna ka caawin karaan dadka waaweyn ee leh waalalka waxyeelada leh, taas oo u oggolaanaysa inay dib u bilaabaan nolol caadi ah. Qofka indho la'aanta soo food saartay, ku tabarucida ***isha*** waxay dib u soo celin kartaa ama dhawri kartaa aragga. Saynisyahanada iyo cilmi baarayaasha waxay u isticmaali karaan indhaha iyo unugyada lagu tabarucay si ay u soo saaraan daaweyno cusub, farsamooyin qalliin ama daawooyinka loogu talagalay cudurrada kuwaas oo awood u leh inay caawiyaan bukaanada mustaqbalka.

# Hannaanka Tabarucaadda

Xubnaha kooxda LifeSource waxa sharaf u ah inay la shaqeeyaan qoyskaaga wakhtiga taburacaadda hadiyadda deeqsinimada leh ee qofkiinii aad jecleydeen. Halkan waxaa ku qoran dulmar kooban oo ku saabsan wixii dhacay waqtigii tabarucaadda.

## Isbitaalka

Hannaanka tabarucaadda waxa ay bilaabmatay ka dib markii dhammaan dadaallada lagu badbaadinayo nolosha qofkaagii aad jeclaydeen laga quustay oo geeri ay ku dhawaaqeen khubarada caafimaadka. Kooxda dhakhaatiirta iyo xirfadlayaasha ee daryeelayay qofkaagii aad jeclayd kuma lug lahayn oggolaanshaha ama soo bixinta tabarucaadda unugyada iyo isha.

## Fursadaha loogu talagalay Tabarucaadda

Kooxdeena LifeSource waxay la shaqeysay xirfadlayaal caafimaad si ay u go'aamiyaan fursadaha ku aadan tabarucaada unugga iyo isha iyada oo lagu saleynayo taariikhda hore ee caafimaadka qofkaagii aad jeclayd.

## Oggolaanshaha Tabarucaadda

Haddii qofkaagii aad jeclayd uu qaato go'aanka ah inuu noqda ku tabaruce, waxaan ku caawinay inaan sharafno go'aankooda. Qofkaagii aad jeclayd waxaa laga yaabaa inay diiwaangeliyeen go'aankooda iyaga oo calaamadeynaayo sanduuqa ku yaalo leesinkooda darawalnimada ama kaarka aqoonsiga gobolka, iska diiwaangeliyeen diiwaangeliyaha tabarucaha onlaynka ah, ama dardaaran hore.

Haddii qofkaagii aad jeclayd uusan go'aan ka gaarin wax ku saabsan tabarucaadda, waxaa laga weydiiyay inaad adigu go'aan ka gaarto wax ku saabsan tabarucaadda iyaga badelkooda. Xubnaha kooxda LifeSource ayaa idinkala shaqeeyay adiga iyo qoyskaaga si aad u dhammaystirtaan su'aalaha ku saabsan qofkaagii aad jeclayd taariikhdiisa caafimaad iyo mid bulsho si loo hubiyo badqabka iyo ku guuleysiga tallaalida unuggooda ama indhahooda.

## Soo bixinta Unugga iyo Isha

Qofkaagii aad jeclayd unnugga uu tabarucay waxaa soo saaray takhasuslayaal ku sugan qolka qalliinka ama qolka qalliinka ee isbitaalka. Haddii qofkaagii aad jeclayd uu ahaa il tabaruce, indhaha waxaa soo saaray farsamayaqaano aad u tababaran. Daryeel iyo xushmad badan ayaa loo muujiyay qofkaagii aad jeclayd intii lagu guda jiray iyo ka dib soo bixinta.



## Diyaarinta Unnuga & Indhaha

Soo bixinta ka dib, qofkaagii aad jeclayd hadiyadiisa waxa loo diray mid ka mid ah iskaashatadeena mas'uulka ka ah diyaarinta unnuga ama indhaha si ay u go'aamiyaan inay badqab u yihiin ku tallaalida iyo in kale. Iyaga, tookadooda, waxay la wadaagi doonaan hadiyadahan la diyaariyey xarun caafimaad oo ah meesha lagu sameyn doona tallaalida.


Sababtoo ah habraacyada tabarucaadda unnugga iyo isha iyo tallaalista waa kuwa aad u adag, baaritaano badan iyo dib u eegis caafimaad ayaa loo baahan yahay. Iyada oo lagu saleynayo natiijooyinka ka soo baxa dib u eegisyadaan, unugyadda ama indhaha qaarkood ayaa laga yaabaa in loo arko in aysan ku habboonayn tallaalka. Dib u eegistan caafimaad ee baaxada weyn leh ayaa laga yaabaa inay qaadato bilo badan in la dhammaystiro, taas oo keeneyso in unugga la tabarucay la tallaalo sannad ama ka badan tabarucaada ka dib. Iyada oo loo marayo hannaankan dhammaystiran ayaan ku sii wadi karnaa inaan caawino kumanaanka bukaanka ee sugaya tallaalka.

## Natiijooyinka Tallaalista

Waxa ku lifaaqan buug yarahaan warqad ka socoto LifeSource oo sharraxaysa waxa ay yihiin hadiyadaha la bixiyay iyo sida ay u caawin karaan shakhsiyaadka u baahan. Fadlan ogow in tabarucaadda qofkaagii aad jeclayd loo maareeyay si daryeel, daacadnimo iyo khibrad badan leh iyada oo la rajaynayo bixinta natiijada ugu wanaagsan ee suurtagalka ah ee ku aadan qoyskaaga iyo qaatayaasha heli kara.

## Xiriirka Qaataha Unnugga

Maaddaama ku soo wargelinta macluumaadka qaataha unugga ee isbitaallada ay tahay mid mutadawacnimo ah, macluumaadka shakhsiyeed lama heli karo waxaana laga yaabaa in aadan wax war ah ka helin qaatayaasha unugyada qofkaagii aad jeclayd. Diyaarinta unnugga la tabarucay si loogu tallaalo waa hannaan baaxad weyn waxaana laga yaabaa in aanaan haynin macluumaadka ku saabsan hadiyadda qofkaagii aad jeclayd mudda ilaa shan sano. Fadlan ahaw mid xaqiiqsan, deeqsinimada qofkaagii aad jeclayd had iyo jeer waxaa xusi doona kuwa noloshooda uu dib u soo nooleeyay.



## Xiriirka Qaataha Isha

Unnugga isha ayaa lagu tallaali karaa ilaa laba toddobaad ka dib tabarucaadda. Waxaa lagugu soo dhaweynayaa inaad u qorto qaataha ishii qofkaagii aad jeclayd wakhti kasta. Fadlan u gudbi warqadaa LifeSource waxaanan xaqiijin doonaa in loo gudbiyo ururka iskaashatadeena kaasoo, iyaguna, u gudbin doona qaataha qofkaagii aad jeclayd. Xaaladaha qaarkood, waxaynu ogaanaa in unugyada isha ee la soo saraay aysan ku haboonayn in la tallaalo. Xaaladahan, qofkaagii aad jeclayd hadiyadiisa waxa laga yaabaa in loola wadaagay cilmi baaris ama tababar si gacan looga geysto kordhinta caafimaadka bukaanada mustaqbalka.

## LifeSource: Yaan Nahay

LifeSource waa urur aan faa'iido doon ahayn oo u heellan badbaadinta iyo bogsiinta nolosha iyada oo loo marayo ku tabarucidda xubin, il iyo unug oo ku taalla Minnesota, North Dakota, South Dakota iyo qaybo ka mid ah galbeedka Wisconsin.

Qoysaska aanu u adeegno, LifeSource waxay bixisaa dhammaan kharashyada la xiriira ku tabarucidda unugga iyo isha. Haddii aad hesho biil la xiriira tabarucaadda, fadlan nagula soo xiriir sida ugu dhakhsaha badan ee suurtagalka ah. Waxaad kala xiriiri kartaa Waaxda Maaliyadeena adiga oo wacaya **1.888.536.6283**.





## Andrew Erickson

Maalmahan, Andrew Erickson waxa uu hayaa shaqo badan.

Taasi ma aha sarbeeb: waxaa uu hayaa wax badan oo uu ku dhex qaado gabadhiisa yar ee Harriet iyo mataanaha Gus iyo Louie. Aabbe ahaan, Andrew waxaa uu soo qaadaa, xajiyaa, caawiyaa, istareexiyaa, oo uu qaadaa saddexdiisa carruur ah marar aan tiro lahayn maalin kasta.


Andrew waxaa uu u mahadcelin karaa qof kale joogiisa xasilan iyo lugahiisa xoogga leh si uu kor ugu haayo caruurtiisa qaaliga ah. Waxa uu helay hadiyad seed ah oo ka timid tabaruce unug.

Intii lagu guda jiray ciyaarta kubbadda-xaaqinka, Andrew waxaa ku dhacday dhicid xun. Jilibkiisa ayaa hal dhinac maray, xaaqinkiina mid kale, aakhirkiina Andrew waxa la soo dhigay isbitaalka. Jilibkiisa ayaa horay ugu dhaawacmay shil kale oo isboortis ah dhowr sano ka hor, oo qaloocan cusubna waxaa uu la macno yahay inuu u baahan doono inuu badelo seedaha jaban.

Andrew waxa uu hadiyad khaas ah ka helay qof uusan waligiis la kulmi doonin. Hadiyaddaas, oo ka timid qof naxariis badan oo doortay inuu noqdo ku tabarucaha unug, waxay ku soo celinaysaa Andrew inuu socoda, shaqeeyo, iyo in uu noqda mid waxqabad leh. Qallitaankiisa ka dib, isaga oo si fiican u daryeelaya seedihiisa cusub iyo jilibkiisa bogsoonaayo, Andrew waxaa uu go'aansaday inuu ugu mahadceliyo qoyska tabarucahiisa warqad.

Ku socoto Andrew, waxaa uu dareemay baahida  in uu ku dhaho mahadsanid.Si uu u muujiyo mahadnaq waxa uu dareemay in ay ahayd hadiyad khaas ah. Iyo in uu u sheego in dhaxalka qofkoodi ay jeclaayeen ay isaga muhiimad u lahayd, gaar ahaan, iyo in hadiyadda ay muhiim u ahayd isaga iyo qoyskiisaba.

Sida RN ee Caafimaadka Neerfaha ICU, Andrew waxaa uu daryeelaa bukaano badan. Sida aabbe iyo say ahaan, waxaa u daryeelaa qoyskiisa. Qaate ahaan, waxaa uu daryeelaa hadiyad uu ka helay qof uusan waligiis la kulmi doonin. Mar kasta oo uu hool u soo dego isaga oo u socda bukaan, ama uu ilmaha sariirta saaro—waxaa uu u mahadcelin karaa tabarucahiisa. Waa uuna sameeyaa.



LifeSource

ORGAN, EYE AND TISSUE DONATION

2225 West River Road North
Minneapolis, MN 55411

Taleefoonka:: 612.800.6100
Lambarka-Bilaashka ah: 1.888.5.DONATE
**www.life-source.org**

DF051818